Gunaanadka Qorshaha Kalaguurka ee ADA Title II Public Right of Way

Dulmarka
Gunaanadka Qorshaha Kalaguurka ee ADA Title II Public Right of Way ee Waaxda Gaadiidka Portland (Portland Bureau of Transportation's) (PBOT) waxaa diyaariyay Dowladda Hoose ee Portland markay taariikhdu ahayd Luulyo 21, 2021.

Xeerka Naafonimada ee Maraykanka [Americans with Disabilities Act(ADA] Title II wuxuu ka rabaa dowlad goboleed kasta iyo dowlad deegaan kasta oo leh shaqaale gaaraya 50 ama kasii badan in ay lahaato qorshe kala guur.

Qorshaha kalaguurka waa in ay ku jiraan waxyaabaha soo socda:

- Waa in uu muujiyaa dhammaan caqabadaha PBOT ka haysta wadooyinka iyo marshebiyeediyada
- Waa in uu muujiyaa miisaaniyadda iyo jadwalka lagu hirgalinaayo qorshaha
- Waa in uu bixiyo hanaan uu dadweynuhu cabashadiisa kusoo gudbin karo
- Waa in uu muujiyaa qofka mas'uulka ka ah hirgalinta qorshaha
- Waa in uu oggolaadaa helidda dhammaan barnaamijyada PBOT

PBOT waxaa ka go'an samaynta nidaam gaadiid oo cid walba isticmaali karto. Marka aanu maalgashanayno kaabeyaasha gaadiidka, waxaanu u qabanaynaa howshaas qaab wanaagsan oo si ballaaran u taageeraya helitaanka una fudaydinaya isu socodka dadka caddaanka ahayn, kuwa dakhligoodu hooseeyo, iyo dadka naafada ah.

Gudaha Portland, PBOT waxay mas'uul ka tahay in ay bixiso:

- jardiino,
- calaamadaha meesha dadku waddada ka gooyaan,
- marshebiyeediyada,
- meelaha baabuurta la dhigto, iyo
- boosteejooyinka (transit stop) Aerial Tram iyo Portland Streetcar.

Boosteejooyinka (transit stop) basaska iyo tareenada magaalada ka dhex shaqeeya ay istaagaan guud ahaan waa mas'uuliyadda TriMet laakiin waddooyinka ama marshebiyeediyada lagu imaanayo waa mas'uuliyadda PBOT.

PBOT waxay TriMet kala shaqayn doontaa shuruucda boosteejooyinka (transit stop) basaska.

Ka dhigista Portland mid si fiican loo wada gaari karo

Qorshaha Kalaguurka ah hadda ayaa la diyaariyay meelmarintiisuna si rasmi ah ayaa ay u bilaabanaysaa. Si kastaba ha ahaatee, PBOT waxay kor usii qaadaysaa nidaamka gaadiidka si uu u noqdo mid la wada heli karo ku dhawaad mashruuc kasta. Mashaariicda sida Fixing Our Streets, Central City in Motion, Neighborhood Greenways, Safe Routes to Schools iyo mashaariicda kale waxay casriyeeyaan waxyaabaha ku saabsan isku socodka si hanaankaas looga dhigo mid la heli karo. Shaqada Dayactirka ee PBOT waxay sidoo kale sare u qaadaysaa helitaanka ayada oo dhisaysa jardiino habboon inta lagu jiro mashaariicda banaynta, tusaale ahaan. Ugu danbayntii, mashaariicda shirkadaha gaarka loo leeyahay (iyo qaar kamid ah shaqada shirkadaha adeegga bixiya) ayaa inta badan hanaanka isku socodka ka dhiga mid la heli karo.

Intaa waxaa dheer, PBOT waxay mas'uul ka tahay ka dhigista xeerarka, hanaanada ay tahay in la raaco, iyo shuruucaha kuwo si fudud loo heli karo. Mid kamid ah tusaalooyinku waa maaraynta iyo kala habaynta goobaha la heli karo ee baabuurta la dhigto si loo xaqiijiyo in si fudud loo heli karo. Midka kale waa isticmaalka luuqadda qandaraaska oo aan la baddali karin ka dib heshiiska taasoo ka doonaysa qandaraasleyaasha ama iibiyeyaasha in ay u bixiyaan howlaha, adeegyada, iyo barnaamijyada si waafaqsan ADA. PBOT waxay sii wadi doontaa in ay dib u eegto ayna uga baddasho wixii loo baahdo xeerarka, qaababka, shuruucaha kolba sida loogu baahdo. Xubnaha bulshada ayaa ka qaybqaadan doona si ay wax ugu biiriyaan markay ku haboontahay.

Barnaamijyada Bananynta marinada

Waxaa jira barnaamijyo u ogolaanaya xubnaha bulshada in ay codsadaan in dib u habayn lagu sameeyo marinada jardiinada, calaamadaha codka siidaaya ee meelaha dadku ay waddada ka gooyaan, iyo marshebiyeediyada.

Barnaamijka Ramps by Request wuxuu dadka daggan Portland siinayaa awood ay kusoo gudbin karaan goobaha markii jardiino lagu daro ka caawinaya in ay samaysmaan marino ay isticmaalaan ayagu ama xubnaha qoyska ee naafada ah ee ku nool xaafaddooda. Waa kan lifaaqa aad barnaamijkaas ku gali karto.

Foomka Curb Ramp Request

Xubnaha bulshadu waxay codsan karaan in loo rakibo calaamadaha codka leh ee loogu tala galay meelaha ay dadku waddada ka gooyaan ayaka oo isticmaalaya lifaaqaan.

Foomka Codsiga Calaamadaha Codka leh ee loogu tala galay Meelaha dadku waddooyinka ka gooyaan

Xubnaha bulshadu waxay soo wici karaan 503-823-SAFE (7233), si ay usoo sheegaan goob katirsan waddada ama marshebiyeediga oo aan ammaan ahayn.

Waxaa sidoo kale jira qaab cabasho oo gaar ah rasmina ah. Waa kan lifaaqa aad hababkaas ku gali karto.

Buuxinta Cabashada ADA Title II

Fidinta Qorshaha Kumeelgaarka ah
Qorshaha qabyada ah waxaa la shaaciyey Ogoosto 2020. Waxaa si toos ah loo siiyay in ka badan 150 ururada bulshada ah kuwaas oo taageera una adeega dadka naafada ah iyo ururada dhaqan ahaan gaarka ah. Websayt loogu tala galay qorshaha kumeelgaarka ah ayaa bixiyay muuqaal kaasoo qeexaya qorshaha. Wuxuu sidoo kale qorshaha ku daray, dulmarka qorshaha, iyo xog ururin ayada oo mid kasta loo tarjumay 10 luuqadood. PBOT waxay marti galisay 6 kulamada maqalka iyo muuqaalka ah waxayna usoo bandhigtay 13 ururada bulshada ama kulano ah oo kale.

Meelmarinta iyo Tallaabooyinka Xiga
Kani waa qorshe 20 sano soconaya waxaana wax laga badalayaa 5tii sano ee kasta. PBOT waxay kusoo daabici doontaa warbixinta horumarka ee sanadlaha ah websaytka qorshaha kalaguurka ah. Mashaariicda PBOT iyo shaqada kale waxay si joogto ah u badali doonaan nidaamka gaadiidka si looga dhigo mid waafaqsan shuruucaha. Shaqada kale ee dhacaysa sanadaha hore ee hirgelinta qorshaha waxaa kamid noqon doona qiimayn ballaaran oo lagu samaynayo si loo ogaado waxa aan diyaarka ahayn waafaqsanayna shuruucaha si markaasi qorshaha sannadada dambe loo dejiyo iyadoo la isticmaalayo xogtaasi.

Mashaariicda ay PBOT maalgalinayso, shaqada dayactirka, shaqada ay shirkadaha adeegyada bixiyaa samaynayaan, iyo dhismeyaasha ay shirkadaha dhismuhu samaynayaan waxaa inta badan kamid ah marshebiyeediga, jardiinada, calaamadaha meelaha dadku waddooyinka ka gooyaan, meelaha baabuurta la dhigto, iyo shaqada boosteejooyinka gaadiidka. Intaa waxaa dheer, waxaa jira miisaaniyad loogu tala galay dhismaha jardiinada ilaa 2032 taasoo la xiriirta heshiis gaar ah.

Waa kuwaan lifaaqyada qorshaha kama danbaysta ah.

Gunaanadka Qorshaha Kalaguurka ee ADA Title II Public Right of Way oo Ingiriisi ku qoran

Gunaanadka Qorshaha Kalaguurka ee ADA Title II Public Right of Way oo Isbaanish ku qoran

Gunaanadka Qorshaha Kalaguurka ee ADA Title II Public Right of Way oo Af-shiinays ku qoran

Gunaanadka Qorshaha Kalaguurka ee ADA Title II Public Right of Way oo Af-fiitnamiis ku qoran

Gunaanadka Qorshaha Kalaguurka ee ADA Title II Public Right of Way oo Af-ruush ku qoran

Wixii su’aalo iyo faalooyin ah waxaa iimayl loogu soo diri karaa ADATransitionPlan@portlandoregon.gov